


Tabbabarkan Shaqaalaha Cusub

Waxaan kuugu hambalyeynayaa xirfadaada shaqo ee cusub!

Carewell SEIU 503 Training wuxuu ku siinayaa agabka aad u baahan tahay si aad u siiso macaamiilkaaga taageerada iyo daryeelka ugu saameynta badan — ugu degdegga badan — ee suuragalka ah. Iyada oo aad ku qaadaneysa tabbabar saddex qeyb ah, waxaad wax ka baran doontaa dooraanka daryeel bixiye ahaan waxaana lagu bidhaamin doonaa siinta adeegyo tayo sare leh macaamiisha.


Bad-qabkaaga iyo bad-qabka dadka aad taageeraha siineysa ayaa muhiim inoo ah. Taasi waa sababta ay Carewell gebi ahaan ugu bixineysa tabbabarkan onleen ahaan inta lagu jiro cuddurka COVID-19 ee dunida qabsaday. Carewell SEIU 503 Training waxay diyaar u tahay inay kaa caawiso inaad bilowdo xirfadaada shaqo adiga oo ilaalinaya kala fogaanshaha bulshada.

Tabbabar Shaqo




- Onleen, Qofka Asagaa Iswado
- 4 saacadood
- Ka Hor Shaqaaleynta

Tabbabarkan Aasaasiga Onleenka ah



- Onleen, Qofka Asagaa Iswado
- 4 saacadood
- 120 maalmood gudahooda marki la helo lambarka bixiyaha

Aqoon Isweydaarsiga Aasaasiga ah




- Onleen, Aqoon Kororsi Onleen Ah oo Toos Ah
- 4.5 saacadood
- 120 maalmood gudahooda marki la helo lambarka bixiyaha

Si aad u bilowdo*, tag CarewellSEIU503.org/training oo isku diiwaangeli Tabbabarkan Shaqada Shaqaalaha Cusub.

*Hubso inaad dirto codsi ka hor inta aadan bilaabin tabbabarashada. Codsiga waxaa laga heli karaa OHCCworkforce.org/applications.

Suaalo miyaad qabtaa?

Booqo CarewellSEIU503.org/training, iimayl ku soo dir CarewellSEIU503training@RISEpartnership.com ama soo wac 1-844-503-7348.




Carewell
SEIU503

Tabbabarkan Shaqaalaha Cusub: Talaabooyinka Guusha

1. U dir codsi hay'ada maxalliga aad rabto inaad la shaqeyso. Codsiga waxaa laga heli karaa OHCCworkforce.org/applications.
2. Cinwaan ka sameyso Carewell Learning Portal (Bogga Intarnetka Barashada ee Carewell). Waxaad halkaas ka geli kartaa bogga intarnetka Carewell ee, CarewellSEIU503.org/training.
3. Markaad gasho bogga barashada kadib markaad sameysato cinwaan, tag "My Courses" ("Koorsooyinkega"), oo guji "Start" ("Bilow") si aad u bilowdo Tabbabarkan Shaqada. Halkaas, ka dhameyso qeybaha Tabbabarkan Shaqada.
4. Kadib markaad bogto Tabbabarkan Shaqada, sug Lambarkaaga Bixiyaha inuu kaaga imaado Department of Human Services (Waaxda Adeegyada Aadanaha) (DHS) ama Oregon Health Authority (Maamulka Caafimaadka ee Oregon) (OHA). Markaad hesho, geli lambarkaaga daryeel bixiyaha Carewell Learning Portal (Bogga Intarnetka Barashada ee Carewell).
5. Kadib markaad geliso lambarkaaga bixiyaha, waxaa bilaabi kartaa Tabbabarkan Aasaasiga Onleenka ah ee qofka asaga iswado markay diyaar kuu noqoto.
6. Markaad bogto Tabbabarkan Aasaasiga Onleenka ah, waxaad dooran kartaa kulanka aqoon kororsigaaga onleenka ah ee Aqoon Isweydaarsiga Aassaasiga. Aqoon Isweydaarsiga Aassaasiga ah waa qeybta ugu danbeysa ee tabbabarkan.

★ Hambalyo! Waxaad gebi ahaanba bogtay Tabbabarkan Shaqaalaha Cusub!



DHS
Oregon Department of Human Services
Seniors and People with Disabilities
Oregon Home Care Commission
Please print (use blue or black ink), sign and date application.

Homecare Worker Application

Office Use Only

Provider #:

Career Restricted



New Worker Orientation


Are you ready to get started? Visit the Carewell Learning Portal to register today!

[REGISTER HERE](#)



My Courses


See courses you are enrolled in



Provider Number Input task


Online Course

[Start](#)



Online Core Curriculum

[Start](#)



Core Workshop Curriculum

[Start](#)

Tabbabarka Shaqaalaha Cusub: Su'aalaha Inta Badan Laisweeydiiyo

Sideen isku diiwaangeliyaa?

Gal [CarewellSEIU503.org/training](https://www.CarewellSEIU503.org/training), tag bogga New Worker Training (Tabbabarka Shaqaalaha Cusub) oo guji "Register Here" ("Halkan Iska Diiwaangeli"). Halkaas, waxaad ka sameysan doontaa cinwaan waxaadna isku diiwaangelin doontaa Tabbabarka Shaqada. Waxaad ka geli kartaa taleefan casri ah, tablet, ama kombuyuutar. Kadibna waxaad heli doontaa tilmaamo ku saabsan sida loo dhameystiro tabbabarka. Fadlan la soco waxaad u baahan doontaa cinwaan iimayl oo shaqeynaya si aad u bilowdo.

Sideen u buuxin karaa codsi?

Ka hor inta aadan tabbabar xaadirin, waa inaad codsi gudbiso si aad u noqoto shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shaqsiyeed ee cusub. Si aad u codsato waxaad raaci doontaa tilmaamaha hay'ada aad ka codsaneyso. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa [OHCCworkforce.org/applications](https://www.OHCCworkforce.org/applications).

Goormeen bilaabi karaa tabbabarka?

Waxaad bilaabi kartaa tabbabarka shaqada isla haddadan. Waxaad bilaabi kartaa Tabbabarka Aasaasiga Onleenka ah iyo Aqoon Isweydaarsiga Aasaasiga ah kadib marka aad bogto Tabbabarka Shaqada, aad marto baaritaanka taariikh dambiyeedka oo aad lambarkaaga daryeel bixiyaha ka hesho Department of Human Services (Waaxda Adeegyada Aadanaha) (DHS) ama Oregon Health Authority (Maamulka Caafimaadka ee Oregon) (OHA). Tabbabarka Shaqada iyo Tabbabarka Aasaasiga Onleenka ah waa kuwo qofka asaga iswado marka uma baahnid inaad hal fadhi ku bogto horusocodkaagana waa la keydin doonaa intaa aad sii socoto. Qeybta ugu danbeysa, Aqoon Isweydaarsiga Aasaasiga ah, waa Aqoon kororsiga onleenka ah oo toos ah

oo leh tabbabare. Marka laga hadlo Aqoon Isweydaarsiga Aasaasiga ah waxaad dooran kartaa xulashooyin maalmo iyo waqtiyo adiga kuu habboon.

Muddo intee le'eg ayuu tabbabarka soconayaa?

Guud ahaan Tabbabarka Shaqaalaha Cusub wuxuu socdaa ilaa iyo 12 saacadood. Wuxuu leeyahay saddex qeybood qeyb kastana waxay socotaa ilaa iyo afar saacadood.

Miyaan shaqsi ahaan u xaadiri karaa tabbabarka?

Maya wali. Waqti xaadirkan dhammaan koorsooyinka Carewell SEIU 503 Training waxaa lagu bixiyaa onleen. Waxaan usii bixineynaa tabbabarka onleenka ah inaan kaa caawino inaad hesho baahiyahaada tabbabarka adiga oo ilaalinaya kala fogaanshaha dadka inta lagu jiro cuddurka COVID-19 ee dunida qabsaday. Markay xaaladu caadi noqoto markale, waxaan rajeeneynaa inaan bixino tabbabarada shaqsi ahaan loo xaadiro. Haddadan, waxaan rajeeneynaa inaa onleen ku kulano.

Maxaan u baahanahay si aan u qaato tabbabarka?

Waxaad u baahan doonta aalad internet leh iyo cinwaan iimayl oo shaqeenayo si aad u bilowdo tabbabarka. Taleefan casri ah, tablet iyo kombuyuutar ayaa dhammaan loo adeegsan karaa boggeena waxbarashada onleenka ah. Hadii aad isticmaaleyso taleefan casri ah ama tablet, xaqiiji inaad ku xirto WiFi, ama waxaad isticmaali kartaa internetka lafta oo aad u badan.



Maxaa dhacaya hadii aan heysanin aalad internet leh?

Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawino! Naga soo wac 1-844-503-7348 si aan kuugu raadino xal adiga kuu shaqeeya.

Ma bixisaan caawimaad xagga luuqada ah?

Haa. Waxaan goordhaw tabbabo ku bixin doonaa Carabi, Ruush, Isbaanish, Fiitnaam, Mandarin (cod duuban) iyo luuqada Shiinaha oo la fududeeyay (qoraal ahaan). Waxaad luuqada aad rabto ka saxan kartaa dhinaca kore ee midig ee bogga internetka Carewell iyo Carewell Learning Portal (Bogga Internetka Barashada ee Carewell). Hadii luuqada aad rabto aanan la heli karin, fadlan nala soo xiriir si aan u ogaano. Waxaan kaa caawin karnaa inaad hesho xal adiga kuu shaqeeya. Fadlan naga soo wac 1-844-503-7348 ama iimayl noogu soo dir CarewellSEIU503training@RISEpartnership.com si aan u ogaano tabbarka aad qaadaneysa iyo luuqada aad rabto.

Miyaan ku heli doonaa lacag gunno ah tabbarka?

Waxaa lagu siin doonaa lacag gunno ah kadib marka aad bogto Tabbarka Aasaasiga Onleenka ah iyo gunno labaad kadib marka aad bogto Aqoon Isweydaarsiga Aasaasiga ah. Wax lacag gunno ah kuma heli doontid Tabbarka Shaqada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan lacagaha gunnada ayaa laga heli karaa boggeena internetka ee, CarewellSEIU503.org/training.

Xageen ka heli karaa caawin?

Waxaan halkan u joognaa inaan ku caawino! Waxaad macluumaad dheerad ah ka heli kartaa boggeena internetka, CarewellSEIU503.org/training ama iimayl inoogu soo dir CarewellSEIU503training@RISEpartnership.com. Waxaad naga soo wici kartaa lambarka 1-844-503-7348 halkaas oo wakiillada laga heli karo inta u dhexeysa 8-da subaxnimo iyo 6-da fiidnimo Isniinta illaa Jimcaha.